

Magaalada Vantaa  
Qeybta barbaarinta iyo waxbarashada  
Qeybta Barbaarinta  
6.5.2020

Daryeeleyaasha carruurta xannaanada dhigata ee sharafta lahow,

Sida lagu xusay siyaasadda cusub ee ay soo saartay dowladda Finland, waxaa si xakameysan oo qeyb qeyb ah loogu laabanayaa waxbarashadii iyo barbaarintii sida uu dhigayo xeerka waxbarashada aasaasiga ah laga billaabo 14 bisha Maajo. Qeybaha barbaarintu awalba ilaa iyo hadda wey furnaayeen, balse waxay talada adag ee bixiyey aheyd in ilmaha guriga lagu xannaaneeyo. Waxaa la baabi'in doonaa xannibaadaha xannaanooyinka, ayadoo ay carruurta ku laaban karaan qeybtii barbaarinta. Waxay qeybta caafimaadku caddeeyeen in ay ammaan tahay in ay carruurta ku laabtaan qeybta barbaarinta.

Waxaa islamarkaasna 13.5.2020 meesha ka baxaya oo joogsanaya soo celintii lacagtii dheeriga aheyd ee la xiriirtay lacagta laga qaado macaamiilka qeybta barbaarinta, taasoo ay sababta u aheyd ka maqnaanshaha xannaanada. Dhinaca ogolaanshaha dammaanadda booska xannaanada ee qeybta barbaarinta ee magaalada, waxaa loo laabanayaa qaab-dhaqankii caadiga ahaa ee ahaa in xannaano ka-joojintu ay socoto ugu yaraan 2 bilood.

Dhammaan xannaanooyinka qeybta barbaarinta iyo xannaanooyinta kooxda qoyskuba waxay furmayaan laga billaabo 14.5.2020. Maya xannaanooyinka furan ee adeegyada uu sharcigu sheegayo, jardiinooyinka ku yaalla meelaha la deggan yahay iyo hoolalka ama qolalka ay dadku ku kulmaanba waxay weli ahaanayaan kuwo xiran.

Laga billaabo 14.5. mar dambe lama qabanqaabinayo waxbarashada horudhaca ah ee lagu qaato guriga. Waa in uu ilmuhu ka qeyb qaataa waxbarashada horudhaca ah. Haddii loo baahdo in la maqnaado waa in ogolaansho la dalbadaa. Madaxa xannaanada ayaa ka baaraandegaya in ay jiraan sababo loo siin karo ogolaanshaha. Tusaale ahaan jirro ama in ardayga ama qof qoyskiisa ka mid ahi uu ka tirsan yahay kooxda khatarta ku jirta marka laga eego dhinaca khatarta qaaditaanka cudurka, ayadoo ay taasi tahay sabab la aqbali karo in uu ku maqnaado.

Kooxaha xannaanooyinka ee ay carruurta ka kooban yihiin waxaa intii suurtoagal ah laga dhigayaa ku yar yar, ayadoo ay hawlaha barbaarinta ee maalinlaha ahi u dhacyaan si ka yar kooxihii carruurta ee caadiga aheyd. Marka hawsha la qabanayo waxaa laga faa'iideysanayaa dhammaan meelaha gudaha iyo bannaanka ah ee ay xannaanadu isticmaasho si carruurta iyo dadka waaweyniba ay intii suurtoagal ah u joogaan meelo waasac ah. Xilli maalintii ah waxay carruurta bannaanka u baxayaan wax badan, ayagoo kooxo yar yar ah, si qeyb qeyb ah ayeyna u baxayaan iyo saacado kala duwan. Marka ay carruurta imaaneyso xannaanada iyo weliba xaaladda waditaankaba, waxaa loo qaabeynayaa in aysan daryeeleyaashu soo gelin gudaha xannaanada iyo in la ilaaliyo masaafada jir ahaaneed ee leysku jirsanayo. Xannaanada lama keeni karo alaabta ay carruurta ku ciyaarto ee ay gurigooda kasoo qaateen. Xaaladaha cuntaynta ee carruurta waxaa sidoo kale loo diyaarinayaa si kooxo yar yar ah. Xilliga maalinta lagu jiro waxaan ilaalineynaa tilmaamaha nadaafadda ee la dardargeliyey, waxaan ku hindhiseynaa gacanta cududdeeda, waxaan dhaqeynaa gacmaha mar kasta oo aan gudaha soo galno, cuntada kahor iyo mar kasta oo suuliga la galo iyo weliba marka guriga loo laabanayo. Inkasta oo ay jirto in si aad ah loo dardargelinayo nadaafadda, haddana

waxaan ka taxaddareynaa in uu ilmuhu helo u dhowaanshaha dadka waaweyn ee uu u baahan yahay, nabadgelyo iyo weliba intii suurtoagal ah isdhexgal iyo wadasheekeysii sidii hore oo kale ah.

Sida waafaqsan tilmaamaha waaxda caafimaadka iyo fayodhowrka, waa in uu ilmuhu joogaa gurigiisa, haddii uu xitaa leeyahay hargab yar calaamadihiis. Wuxuu ilmuhu kusoo laaban karaa xannaanada markii aan wax calaamad ah lagu arkin muddo habeen iyo maalin ah. Qofka qaaday caabuqa koroonaha waa in uu xannaanada ka maqnaadaa ugu yaraan muddo todobo maalmood ah, oo ka billaabaneysa markii calaamadaha lagu arkay, balse haddii loo baahdo waxaa lasii wadi karaa muddo intaas ka dheer oo ah in aan ugu yaraan labo maalmood lagu arkin wax calaamad ah kahor inta uusan kusoo laabanin xannaanada. Dhinaca qiimeynta caafimaad ee ka qeyb qaadashada xannaanada ee carruurta ka midka ah dadka uu halista ku yahay cudurkani waxay ku saleysan tahay qiimeynta uu sameeyo dhakhtarka mas'uulka ka ah daaweyntiisa. Dhakhtarka mas'uulka daaweyntiisa ayaa qiimeyn ku sameynaya in uu xannaanada ku laaban karo ilmaha qaba cudur aasaasi ah ee daran ama qof qoyskiisa ka mid ah uu qabo, ama u baahan in uu si joogto ah u qaato daawada kala dhantaasha awoodda difaaca ee jirka. Dadka khatarta ugu jira in uu ku dhaco caabuqa koroonaha ee daran waxaa ka mid ah carruurta uu sida kale xanuunkooda aasaasiga ahi keenayo in ay weynaato khatarta ah in uu ku dhaco caabuq daran.

Waxaan ku faraxsanahay arrinta ah, in aan mar kale qaabili karto carruurta imaaneyso xannaanada. Si aan ugu talogalno shaqaale ku filan, waxaan adinka daryeeleyaasha ah idinka codsaneynaa in aad islamarkiiba nasoo ogeysiisaan baahidiina xannaano ee goobta barbaarinta mudda u dhexeysa 14.5. – 31.5. adigoo noogu soo sheegaya khadka taleefanka, email-ka ama qaabka kale ee aad kula ballanteen goobta barbaarinta. Waxay arrintaasi fududeyneysaa in aan ku talogalno shaqaalaha, si loo diyaariyo adeegyada cuntada iyo nadaafadda. Waxaa ka xunnahay oo aan ka cudur-daaraneynaa in aan idin dhibno muddo sidaas u dhaqsiyo badan, annagoo haddeer dhow idinka codsanay in aad nasoo ogeysiisaan baahiyihiina xannaano ee xilliga lagu jiro xagaaga.

Wixii faahfaahin ah oo intaas ka dheeri ah waxaa ku siinaya madaxa xannaanada ee goobtaada barbaarinta. Waxaad qofkaasi madaxda ka ah xannaanada weydiin kartaa faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan qaabka loo diyaarinayo hawlaha iyo su'aalaha maankaada ka guuxaya ee ku saabsan soo laabashada carruurta.

Salaan saaxiibtinimo,

Sole Askola-Vehviläinen  
madaxa qeybta barbaarinta